



Tilmaamaha la Xiriira Covid ee Xarumaha Hoyga IPAS 17ka Maay 2021da

**Fadlan ogow in ogeysiiskan uu beddelayo IPAS-kii horay loo faafiyey ee la
Noolaanshaha Qorshaha Wadajirka ah ee isla markaaba dhaqan gala.**

Booqashooyinka ururada, shirkadaha iyo dadka adeegyada u fidiya maaraynta Xarunta IPAS

Shqaalahaa IPAS iyo Adeegyada kale ee Gobolka, adeeg bixiyeyaasha guud, daryeelka carruurta goobta, shaqaalahaa nadaafadda iyo dayactirka, shaqaalahaa ka shaqeeya adeegga korontada iwm. Aya loo ogol yahay iyadoo la raacayo xayiraadaha Dowladda.

Dhammaan bixiyeyaasha adeegga waxay ku xiran yihin duubista baafinta iyo ilaalinta kala fogaanshaha bulshada iyo nadaafadda habboon.

Booqdayaasha Guud iyo Hay'adaha adeegyada u fidiya Dadka Deggan Xarunta

Oggolaansho waafaqsan tilmaamaha dowladda ee hadda jira:

Ugu badnaan 3 qoys ama 6 qof oo ka kala socda tiro qoysas ah ayaa ku kulmi kara meel banaan oo ku habboon oo loogu talagalay xarunta.

Wakiilkhaa kooxda u doodista / wakiilkhaa sharciga ah ee booqanaya shaqsi degan mesha waa la ogol yahay, iyadoo la waafajinayo tilmaamaha hadda jira.

Saxxiibada Kulamada Xarunta ee dhacaya waxay ahaanayaan kuwo fog.

Dhammaan dadka soo booqanaya waa inay horay u sii ballansadaan, ka tagaan faahfaahinta tix racyadooda xiriirkooda, ilaaliyan nadaafadda habboon oo ay raacaan tallaaboooyinka kala fogaynta bulshada ee ka jira xarunta..

Maqnaanshaha guud ee habeenkii

Waa la oggol yahay in laga maqnaado xarunta laba habeen oo isku xiga oo keliya iyadoo leh shuruudo gaar ah. Karantiil looma baahna soo noqoshada haddii shuruudaha la buuxiyo.

Xaaladaha gaarka ah ee maqnaanshaha habeenkii waxaa ka mid ah shuruud looga doonayo dadka deegaanka inay ku wargeliyaan shaqaalahaa xarunta halka ay joogi doonaan, bixinta faahfaahinta xiriirkooda, soo dejinta barnaamijka baafinta COVID, iyo



oggolaanshaha u hoggaansamida tilmaam kasta iyo tilmaamaha ka imanaya caafimaadka dadweynaha halkaas oo degganaha laga helo inuu yahay qof xiriir dhow la leh kiis qof qabo cudurka.

Ilaa ay ka helaan ogolaansho cad IPAS, degane kasta oo ka maqnaada xarunta in ka badan mudada la oggol yahay waxaa looga baahan doonaa inuu dib uga codsado IPAS hoy cusub oo ay helaan naftooda iyo qoyskoodaba waxaana looga baahan doonaa karantiil muddo 14 maalmood ah.

Maqnaanshaha habeenkii sababo caafimaad awgood

Maqnaanshaha habeen ee daryeelka caafimaadka ee xarun caafimaad oo la aqoonsan yahay waa la ogol yahay iyada oo aan xad lahayn tirada habeennada. Looma baahna karantiil soo labashada.

Wareejinta

Iyada oo ku xiran helitaanka hoy ku habboon oo kale, wareejinta waxaa loo samayn karaa ama looga kala tagi karaa dhamaan xarumaha aan hadda ka dillaacin cudurka. Looma baahna karantiil. Degane kastaa wuu la xiriiri karaa IPAS si uu u codsado wareejin.

U wareejinta ama ka soo wareejinta xarumaha uu ka dillaacay cudurka Covid (2 ama kiisas badan oo hada jira) looma oggola - marka laga reebo xaaladaha degdegga ah oo ay ku xiran tahay heshiis ay la leeyihii saraakiisha Caafimaadka Dadweynaha ee ay khusayso.

Codsiyada Dib-u-dejinta

Iyada oo ay ku xirantahay karantiil 14 maalmood ah oo kaliya xarumaha ka madax banaan COVID.